# Canshuurta Gaadiidka Seattle ee 2024

City of Seattle

Agosto 2024

Haddii ay ansixiyaan codbixiyayaasha Seattle, Canshuurta Gaadiidka Seattle ee 2024 waxay abuuri doontaa $1.55 bilyan muddo 8 sano ah si loogu maalgeliyo horumarinta gaadiidka Seattle. Xaashidan xaqiiqadu waxa ay qeexaysaa meelaha maalgashiga lagu samaynayo barnaamij ahaan waxana ay iftiiminaysaa tusaalayaasha waxa Kharashka Gaadiidku uu maalgelin doono.

- 18-kii sano ee la soo dhaafay, codbixiyaasha Seattle waxay taageereen canshuuraha gaadiidka ee caawinaysa in la maalgeliyo dayactirka iyo hagaajinta jidadkeena, laamiyada, buundooyinka, iyo calaamadaha taraafigga.
- Canshuurta hadda jirta waxay dhacaysaa dhamaadka 2024 waxayna bixisaa qiyaastii 30% miisaaniyadda adeegyada aasaasiga ah ee waaxda Gaadiidka Seattle (SDOT) iyo mashaariicda cusub.
- Canshuurta Gaadiidka ayaa maalgelin doonta hagaajinta sida waddooyinka laamiyada ah, hagaajinta buundooyinka, beerista dhirta, dhisidda waddooyinka iyo jidadka isgoysyada, samaynta isku xirka saldhigyada tareenada fudud iyo gaadiidka, iyo abuurista waddooyin badan oo socod, rogrogis, iyo kuwa baaskiilka meelaha ay dadku ku nool yihiin, ka shaqeeyaan, ku ciyaaran.
- Gudiga Kormeerka Canshuuraha ee xubnaha bulshada ayaa kormeeri doona sida loo kharash gareeyo Canshuurta Gaadiidka si loo hubiyo isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta. SDOT waxa kale oo ay daabici doontaa qorshayaasha shaqo ee sanadlaha ah iyo warbixinaha horumarka si ay u tusto dadweynaha sida loo isticmaalo Cashuurta Gaadiidka.

## YAA BIXINAAYA CASHUURTA GAADIIDKA

Kharashyada waxaa bixiya milkiilayaasha guryaha Seattle. Marka loo eego cashuurta gaadiidka ee hada dhacaysa, mulkiilaha guriga qiimaha lagu qiimeeyay cashuurta dhexe waxa uu bixiyaa qiyaastii $23 bishii. Qiyaasta kharashyada loogu talagalay Canshuurta Gaadiidka 2024 waa:

**$54**
bishiiba **$1,000,000 guri**

**$44**
bishiiba **guryaha qiimaha-dhexe ee $804,000 ah**

**$27**
bishiiba **$500,000 guri**


SOMALI

# Qorshaha Kharash garaynta Canshuurta Gaadiidka

Canshuurta Gaadiidka waxaa loo habeeyay 11 barnaamij, mid walbana wuxuu dabooli doonaa mashaariic. Qaar ka mid ah mashaariicdan ayaa horay loo go'aamiyay, qaar badana waxa la aqoonsan doonaa mustaqbalka.

Si loo doorto mashaariicda lagu maalgelinayo Canshuurta Gaadiidka, SDOT waxay isticmaashaa arrimo kala duwan, oo ay ku jiraan siyaasadaha Magaalada ee horay la dejiyay. SDOT waxay rabta inay u qaybiso maalgelinta cashuurta si cadaalad ah, tasoo ay ku xustay Qaabdhismeedka Sinaanta Gaadiidka Bulshada ee Seattle.

**$1.55 bilyan**
in ka badan 8 sano



# Barnaamijyada Canshuurta Gaadiidka

11ka barnaamij ee Cashuurta Gaadiidka waxa ka mid ah maalgashiyo gaar ah, iyo sidoo kale dabacsanaanta wax ka qabashada baahiyaha mustaqbalka. SDOT waxay raadin doontaa ka faa'iideysiga fursadaha si ay u kordhiso mashaariicda lagu dhisi karo qayb ka mid ah Canshuurta Gaadiidka.

**Aragtida Zero, ee Dugsiga & Badbaadada Xaafada ($160.5M):** Samee hagaajin la beegsaday oo bulshadu codsatay oo lagu sameeyo waddooyinka, laamiyada, isgoysyada, iyo jid goysyada si loo yareeyo isku dhaca gaadiidka, dhaawacyada daran, iyo dhimashada.

**Dayactirka & Casriyeynta Wadada ($403M):** Hagaajinta waddooyinka halbowlaha ah ee ay maraan basaska ugu badan, kuwa xamuulka ah, iyo baabuurta, iyo hagaajinta kaabayaasha dadka lugeynaya, rog-rogaya, baaskiilka raaca, iyo qaadashada gaadiidka.

**Buundooyinka & Dhismayaasha ($221M):** Buundooyinka iyo dhismayaasha ku hay kuwo shaqaynaya oo la isku halayn karo una diyaari mashaariicda mustaqbalka ee buundada.

**Marinada gaadiidka & isku xidhka ($151M):** Ku xidh dadka si badbaado leh xarumaha gaadiidka, oo ay ku jiraan saldhigyada tareenka fudud iyo boosteejooyinka basaska, oo yaree dib u dhacyada wadooyinka baska.

**Badbaadada Jidka qaybta lugta ($193M):** Dhis oo hagaaji jidadka dhinacyadooda, isgoysyada, iyo jid-gooyada si dadka lugaynaya iyo kuwa rogrogaya ay si badbaado leh u gaadhaan halka ay u baahan yihiin.

**Calaamadaha & Hawlgallada ($ 100M):** Ku rakib, ilaali, oo cusboonaysii calaamadaha taraafikada ee hada jira si badbaado leh, dhaqdhaqaaq la isku hallayn karo; kor u qaadida calaamadaha gelitaanka lugaynta iyo baaskiilka; iyo taageer hawlaha taraafikada inta lagu jiro dhacdooyinka waaweyn, shilalka, iyo safarrada gudaha iyo dibadda dekedda.

**Badbaadada Baaskiilka ($133.5M):** Kordhi shabakada haadka baaskiilka ee badbaadsan; isku xidhka dugsiyada iyo jidadka baaskiilka, waddooyinka, iyo jidadka cagaaran ee xaafadda; iyo dayactirka iyo cusboonaysiinta haadka baaskiilka ee jira.

**Waddooyinka Dadka & Goobaha Dadweynaha ($66.5M):** Hawl-geli goobaha caamka ah oo wanaaji iftiinka iyadoo lala kaashanayo degmooyinka ganacsiga iyo ururada bulshada si dadku ay ugu raaxaystaan xaafadaha gaarka ah iyo kuwa firfircoon iyo degmooyinka ganacsiga.


**Cimilada & Adkeysiga ($69M):** Si toos ah wax uga qabo isbeddelka cimilada, yaraynta wasakhowga hawada iyo samaynta doorashooyin gaadiid oo waara oo la heli karo.

**Xamuulka & Dhaqdhaqaaqa Alaabta ($45M):** Samee hagaajinta xamuulka si aad u taageerto baabuurta xamuulka ah ee alaabta iyo adeegyada qaabilsan.

**Maamul Wanaagga & Hindisaha Hirgelinta Sinaanta ($7.5M)**: ilaali isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta cashuur bixiyayaasha Seattle iyo dadweynaha.

# Tusaalooyinka Mashruuca Canshuurta Gaadiidka

Canshuurta Gaadiidka waxaa ku jira mashaariic gaar ah, kuwa waaweyn iyo kuwa yaryarba, kuwaas oo SDOT ay gaarsiin doonto magaalada oo dhan, iyo sidoo kale balaadhinta maalgelinta shaqada dayactirka. Haddi ay ansixiyaan codbixiyayaashu, waa kuwan qaar ka mid ah mashaariicda Canshuurta Gaadiidku ay maalgelin doonto.




**Si aad u aragto liis dhamaystiran oo ah mashaariicda iyo barnaamijyada la qorsheeyay, ka fiirso soo koobida Canshuurta Gaadiidka websaydka hoose.**

www.seattle.gov/transportation/levy • MoveSeattle@seattle.gov • (206) 319-5893